

## **Xaanshida Xaqiiqda Waqtiga Dheeraadka ah Ee Loogu Talagalay Bixiyeyaasha Gaarka ah**

Xaashidan xaqiiqda waxaa loogu talagalay in ay ku caawiso Bixiyeyaasha Gaarka ah fahmka sharciyada ku saabsan xadka shaqada toddobaadka iyo waqtiga dheeraadka ah. Fadlan la xiriir maareeyaha kiiska macmiilka ama booqo [www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT](http://www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

### **MACLUUMAADKA GUUD EE WAQTIGA DHEERAADKA AH**

#### **1. Waa maxay 'toddobaadka shaqada'?**

Toddobaadka shaqada waxaa uu bilaabanayaa maalinta axadda marka ay saacadu tahay 12:00 a.m. (saqda dhexe) waxaa uu dhammaanayaa sabtida xigta marka ay saacadu tahay 11:59p.m.

#### **2. Waa maxay Xadka Toddobaadka Shaqada (WWL)?**

WWL waa tirada guud ee saacadaha adeegga ee laga yaabo in aad shaqayso toddobaadka shaqada. Sharciga gobolka Washington ee 2016 waxaa uu dejiyey xadeyn ku saabsan tirada saacadaha Bixiyaha Gaarka ah (IP) uu shaqayn karo toddobaadka shaqada. Dhammaan Bixiyeyaasha Gaarka ah (IPs) waxaa ay leeyihiin xadka toddobaadka ee shaqada (WWL). Waxaad keliya shaqayn kartaa ilaa iyo WWL-kaaga marka saacadahaas ay kuu qoondeeyeen hal macmiil ama in ka badan macmiilka aad u shaqeysana waxaa uu xaq u leeyahay in uu helo saacadaha. Macmiilka kuuma qoondeyn karo in ka badan saacadaha bilaha ee lagu qiimeeyay Qorshahooda Daryeelka. WWLs waxaa ay gacan ka geystaan kontaroolka qiimaha waqtiga dheeraadka ah si loo hubiyo in maaliyadda adeegyada ay helaan dhammaan kuwa u baahan.

#### **3. Sidee ayay DSHS u go'aamisaa WWL-keyga joogtada ah oo sidee ayaan ku ogaadaa WWL joogtada ah?**

Sharciga gobolka ayaa la ansixiyey bishii Abriil 2016. Sharcigan waxaa uu ogolaaday 40 saac oo WWL ah oo loogu talagalay dhammaan Bixiyeyaasha Gaarka ah ee loogu talagalay kuwa shaqeeyay celcelis ahaan in ka badan 40 saacadaha adeegga ah toddobaad kasta bishii Jannaayo 2016. WWLs ka badan 40 saacadood ayaa la go'aamiyay iyada oo saacadaha adeegga Bixiyaha Gaarkaha ee lacagtooda la bixiyey Jannaayo 2016 loo qaybinayo 4.33 ka dibna laga dhigayo rubac saaca ugu dhow. Bishii Maajo 2016, DSHS waxaa ay boostada ugu dirtay ogeysiisyo Bixiyeyaasha Gaarka ah (IPs) ee shaqeeyay bishii Jannaayo 2016 oo ku qoran macluumaadkooda WWL. WWL joogto ah kama badan karto 65 saacadood. Haddii aad bilowday in aad u shaqeeyo Bixiye Gaar ah ka dib Jannaayo 2016, WWL-kaaga waa 40 saacadood.

#### **4. Maxaa dhacaya haddii aan u maleeyo in WWL-keyga joogtada ah in loo go'aamiyey si qalad ah?**

Haddii aad u maleeyo in WWL-kaaga si qalad ah loo go'aamiyey, waxaad codsi u gudbin kartaa maareeyaha kiiska ee macmiilka ka dibna DSHS waxaa ay dib-u-eegis ugu sameyn doontaa saacadahaaga si waafaqsan Xeerka Maamulka Washington 388-114-0050.

#### **5. WWL-keyga joogtada ah miyuu abad isbeddeli doonaa?**

Haddii WWL-kaaga joogtada ah uu u dhaxeeyo 60.25 iyo 65 saacadood, waxaa uu noqon doonaa 60 saacadood marka ay taariikhdu tahay 1 Luulyo, 2017 haddii isbeddel lagu sameeyo sharciga mooyaane. Haddii kale, WWL-kaaga joogtada ah isma beddeli doono inta aad xaq u leedahay in aan noqoto Bixiye Gaar ah (IP). WWL-kaaga sidiisa ayuu sii ahaan doonaa haddii aad fasax ka qaadatid adeegga ka dibna aad ugu soo noqoto Bixiye Gaar ahaan ah (IP) mustaqbalka.

#### **6. Waa maxay adeegyada ku jira saacadaha adeegga ee WWL-keyga?**

- Daryeelka Shakhsiga
- Daryeelka Gargaarka
- Qaadashada Xirfadaha Tababarka
- Daryeelka Nasinta

#### **7. WWL-keyga ma lagu dabaqi karaa waqtiga socdaalka, tababarka ay DSHS u baahan tahay, ama waqtiga fasaxa ee lacagta lagu qaato (PTO)?**

Maya. Waqtiga socdaalka, tababarka ay DSHS u baahan tahay, iyo waqtiga fasaxa ee lacagta lagu qaato (PTO) laguma daro WWL-kaaga. Taasi waxaa loola jeedaa waxaad shaqeyn kartaa ilaa WWL-kaaga adiga oo u qabanaya hawlo macmiilka sida loogu baahdo, xataa toddobaadyada aad sidoo kale qaadnayso tababarka loo baahan yahay, waqtiga socdaalka ee la ansixiyey, ama aad qaadato waqti fasax ah oo lacag lagu qaato (PTO).

## Xaanshida Xaqiiqda Waqtiga Dheeraadka ah Ee Loogu Talagalay Bixiyeyaasha Gaarka ah

### LACAG-BIXINTA WAQTIGA DHEERAADKA AH (OT)

#### 8. Sidee ayaa loo xisaabiya waqtiga dheeraadka ah (OT) ee aan lacagta ku qaato?

Waxaa lagu siinaayaa mushaarkaaga caadiga ah mar walba ee aad shaqeyso ilaa 40 saacadood toddobaadka shaqada. Mar walba ee aad shaqeyso in ka badan 40 saacadood, waxaa lagu siin doonaa 1.5 oo lagu dhuftey mushaarkaaga caadiga ah.

Nidaamka lacag-bixinta ee IPOne waxaa uu bixiyaa qaddarka dhan ee saacadaha aad ku shaqeyso toddobaadka shaqada mushaarkaaga caadiga ah (ee loo yaqaano "sicirka buuxa"). Waxaa uu u tusinayaa waqtiga dheeraadka ah (OT) sida sicir ½ oo dheeraad ah ee loogu talagalay saacadaha OT. Wadartaasi waxaa la isugu daraa lacag-bixinta/mushaarka kama-dambeyska ah.

*Tusaale:*

*Waxaad shaqaysay 45 saacadood toddobaadka shaqada sicirkaaga caadiga ahna waa \$12/saacadii.*

*Lacag-bixintaada waxaa ay noqon doontaa:*

*45 saacadood x \$12 saacadii (sicirka buuxa) = \$540*

*+ 5 saacadood oo waqti dheeraad ah x \$6 (sicir nus ah) = \$30*

*Isugeyn \$540 + \$30 = \$570*

Waqtiga dheeraadka ah (OT) waxaa lagu soo bandhigaa Sharaxaadda Kooban ee Lacag-bixinta waxaana lagu kala dhigaa Qaybta Kasbashada. Tusaalahan Qaybta Kasbashada waxaa uu muujin doonaa 45 saacadood daryeelka shaqi ah iyo 5 saacadood waqti dheeraad ah (OT).

#### 9. Miyaan lacag-bixin ku qaadan doonaa waqtiga socdaalka, tababarka ay DSHS u baahan tahay, ama waqtiga fasaxa ee lacagta lagu qaato (PTO)?

Waxaa lagu siinaya lacag-bixinta waqtiga dheeraadka ah (OT) ee waqtiga socdaalka iyo tababarka ay DSHS u baahan tahay haddii saacadaha guud ee aad toddobaad shaqaysay ay ka badan yihiin 40. Saacadaha waqtiga fasaxa ee lacagta lagu qaato (PTO) looma tixgeliyo sida saacadaha la shaqeeyay, sidaa awgeed marnaba xaq uma laha lacag-bixinta waqtiga dheeraadka ah (OT).

### MACLUUMAADKA LOOGU TALOGALAY BIXIYEYAASHA GAARKA AH (IPS) EE HAYSTA WWL 40 SAACAD AH

#### 10. Miyaan shaqeyn karaa in ka badan 40 saacadood toddobaadka shaqada?

Ma shaqeyn karto in ka badan 40 saacadood oo adeeg ah toddobaadka shaqada haddii aad ka heshay ogolaanshaha gaarka ah ee macmiilka DSHS mooyaane si aad si aan joogto ahayn ugu shaqeyso in ka badan 40 saacadood.

#### 11. Miyaan shaqeyn karaa in ka badan WWL-keyga joogtada ah haddii aan u shaqeeyo macaamiil badan?

Waa in aad ku maareyso dhammaan saacadaha adeegga macmiilka gudaha WWL-kaaga joogtada ah, iyada oo aan la eegayn inta ay le'eg yihiin macaamiisha aad u shaqeyso. Haddii aad u shaqeyso in ka badan hal macmiil, waa in ay u jadwaleyso waqtigaaga mid kasta si aad u hubiso, marka aad isku wada darto dhammaan saacadahaaga adeegga, in aadan shaqeyn in ka badan WWL-kaaga joogtada ah.

#### 12. Maxaan sameeyaa haddii macmiilka aan u shaqeeyo uu doonayo in uu ii jadwaleeyo in aan shaqeeyo saacado badan marka la eego saacadaha aan ka heli karo WWL-keyga joogtada ah?

- U sharax in aan laguu ogoleyn in aad shaqeyso in ka badan WWL-kaaga iyo haddii aad shaqeyso in loo tixgelin doono sheegasho xad-dhaaf ah. Eeg lambarka 19aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sheegashada xad-dhaafka ah.
- Ha aqbalin hawlaha kuu keeni kara in aad shaqeyso in ka badan WWL-kaaga.
- Ku dhiirrigeli macmiilka in uu isticmaalo bixiye dheeraad ah.
- Ku dhiirrigeli macmiilka in uu la xiriiro maareeyaha kiiskiisa/kiiskeeda haddii macmiilka uu waqti adag ku qabo in uu fahmo xadkaaga ama uu heli waayo bixiye dheeraad ah.
- Fadlan ka eeg lambarka 18aad ee ku yaalla bogga 3aad macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan baahiyada degdegga ah.

## Xaanshida Xaqiiqda Waqtiga Dheeraadka ah Ee Loogu Talagalay Bixiyeyaasha Gaarka ah

### MACLUUMAADKA LOOGU TALOGALAY BIXIYEYAASHA GAARKA AH (IPS) EE HAYSTA WWL JOOGTO AH OO AH 40.25 SAACADOOD AMA IN KA BADAN

#### 13. Miyaan shaqeyn karaa in ka badan 40 saacadood toddobaadka shaqada?

Haddii aad ka heshay ogeysiis DSHS ee ah in WWL-kaaga joogtada ah in uu ka badan yahay 40 ama haddii aad lahayd WWL gaar ku ah macmiil oo aan joogto ahayn, waxaad shaqeyn kartaa ilaa tirada saacadaha ku qoran ogeysiiskaaga.

#### 14. Maxaan sameeyaa haddii aan u shaqeeyo in ka badan hal macmiil?

Fadlan eeg jawaabta su'aasha lambarka 11aad.

#### 15. Maxaa dhacaya haddii macmiilka aan u shaqeeyo uu doonayo in aan isku-hagaajiyo saacadaheya si aan u shaqeeyo in ka badan WWL joogtada ah hal toddobaad?

Waxaad awoodi kartaa in aad isku-hagaajiso saacadahaaga haddii dhammaan kuwan soo socda ay run yihiin:

- Macmiilka uu leeyahay baahi; iyo
- Shaqaynta saacadaha dheeraadka ah in aysan ka badaneyn saacadaha loo qiimeeyay macmiilka bil kasta; iyo
- Shaqaynta in badan hal toddobaad aysan keeni doonin in macmiilku uu waayo daryeelka aasaasiga ah toddobaadyada kale ee bisha; iyo
- Shaqaynta in badan hal toddobaad aysan kuu keeni doonin in aad waqti dheeraad ah shaqeyso bisha marka loo eego haddii aad shaqeyso ilaa WWL-kaaga toddobaad kasta ee bishaas.

Marka WWL-kaaga uu ka badan yahay 40, waxaad isugu hagaajisan kartaa saacadahaaga sida loo baahan yahay haddiiba aadan shaqeynayn waqti dheeraad ah oo badan bisha gudaheeda marka loo eego inta caadiga ah ee aad shaqeyso. Qaddarka saacadaha waqtiga dheeraadka ah ee bil kasta waxaa la xisaabiyaa iyada oo laga jarayo 40 saacadood WWL-kaaga ka-dibna lagu dhufanayo inta harsan tirada Sabtiyada bishaas.

#### Tusaale:

*WWL-ga Jose waa 46 saacadood. Qaddarka waqtiga dheeraadka ah ee bil kasta ee Jose uu shaqeyn karo waxaa ay ku xiran tahay tirada Sabtiyada bisha uu shaqeynayo.*

*Xisaabinta 5 Sabti:  $46 - 40 = 6 \times 5 = 30$*

*Xisaabinta 4 Sabti:  $46 - 40 = 6 \times 4 = 24$*

*Macmiilka Jose uu u shaqeeya waxaa uu u baahan yahay in uu ugu shaqeeyo jadwal isbedbedala bisha oo dhan, oo uu Jose sameyn karo haddii uusan shaqeyn in ka badan 30 saacadood bishii leh 5 sabti, ama 24 saacadood oo waqti dheeraad ah bisha leh 4 Sabti.*

Waxaad sidoo kale isku-haajisan kartaa saacadahaaga si aad u shaqayso in ka badan WWL-kaaga haddii macmiilka aad u shaqayso uu ku iibsanayo saacado waqti dheeraad ah miisaaniyadooda Adeegyada Daryeelka Guriga ee Ku Jihaysan Khabiir-isyaaanaha ama Xorriyadda Cusub (New Freedom or Veteran Directed Homecare Services).

#### 16. Maxaan sameeyaa haddii macmiilka aan u shaqeeyo uu doonayo in uu ii jadwaleeyo in aan shaqeeyo saacadaha waqtiga dheeraad ah ee bilaha ee guud oo ka badan marka la eego saacadaha aan ka heli karo WWL-geyga joogtada ah?

Fadlan eeg jawaabta su'aasha lambarka 12aad.

### XADKA TODDOBAADKA SHAQADA GAARKA KU AH MACMIILKA EE AAN JOOGTADA AHAYN (CSWWL)

#### 17. Waa maxay CSWWL aan joogtada ahayn?

Macmiilka aad u shaqayso waxaa uu weydiisan karaa DSHS in ay si aan joogto ahayn u kordhiso WWL-kaaga inta isaga ama iyada ay raadinayaan bixiyeyaal dheeraad ah si aad u buuxiso baahiyadooda. DSHS waxaa ay kuugu soo jawaabaysaa boostada iyada oo ku soo dirayo ogolaansho ama diidmo qoran. Haddii lagu ogolaado, ogeysiiska waxaa uu sidoo kale kuu sheegayaa taariikhda ogolaanshaha ay bilaabaneyso oo ayna dhammaaneyso iyo tirada saacadaha ee la ogolaadey. Macmiilka aad u shaqeyso wuxuu sidoo kale heli doonaa nuqul. Codsigan/ogeysiiskan qoran waxaa sidoo kale loo yaqaanaa codsiga CSWWL. DSHS ma ogolaanayso WWL aan joogto ahayn oo ka badan saacadaha bilaha ee loo qiimeeyay macmiilka.

## **Xaanshida Xaqiiqda Waqtiga Dheeraadka ah Ee Loogu Talagalay Bixiyeyaasha Gaarka ah**

### **BAAHIYADA DEGDEGGA AH**

**18. Maxaan sameeyaa haddii aan shaqeyso dhammaan saacadaha WWL-keyga balse macmiilka uu leeyahay baahi degdeg ah oo ay tahay in aan sii-wado in aan shaqeyso si aan u taageero caafimaadka ama badbaadada macmiilka?**

- La joog macmiilka ilaa xaaladdu ay ka noqoto mid ammaan ah oo xassilan.
- Haddii ay jirto xaalad degdeg ah ee u baahan adeegyo caafimaad oo degdeg ah, la xiriir 9-1-1.
- U jooji maalintaada shaqada sida ugu dhaqsiiyaha badan ee ay ammaan u tahay in sidaa la sameeyo.
- La xiriir maareeyaha kiiska maalinta shaqada ee xigta si aad u sharaxdo xaaladda.

### **SHEEGASHADA XAD-DHAAFKA AH**

**19. Waa maxay sheegashada xad-dhaafka ah?**

Sheegashada xad-dhaafka ah waxaa ay dhacdaa marka:

- Aad shaqeyso saacado adeeg badan bishii marka loo eego inta lagu idmey in aad bixiso; ama
- Aad shaqeyso saacado ka badan saacadaha WWL-kaaga ee aanu ansixin DSHS; ama
- Aad sheegato saacado socdaal badan marka loo eego kuwa lagu idmey in aad bixiso toddobaadka shaqada.

**20. Waa maxay Tallaabada Sharci ee Qandaraaska?**

Tallaabada sharci ee qandaraaska waa ogeysiiska ay kuu soo dirto DSHS. Ogeysiiska waxaa uu kugu wargelinayaa in aad shaqeyso waqti dheeraad ah oo ka badan saacadaha adeegga ama saacadaha waqtiga socdaalka marka loo eego kuwa lagu ogolaadey in aad shaqeyso.

**21. Maxaa dhacaya haddii aan shaqeyso in ka badan WWL-keyga ama xadka waqtiga socdaalka?**

- Waqti kasta oo aad sheegato xad-dhaaf, waxaad heli doontaa ogeysiis tallaabo sharci ee qandaraaska ah oo qoran iyo macluumaad DSHS oo ku xasuusinaya muhiimadda ay leedahay in aadan shaqayn waqti dheeraad ah oo aan la ogolayn. Ogeysiiska waxaa sidoo kale loo diri doonaa macmiilka(macaamiisha) aad u shaqeyso iyo wakiiladooda.
- Dhacdada saddexaad ee aad sheegato xad-dhaaf, qandaraaskaaga waxaa laga yaabaa in la joojiyo ama waxaad dhici karta in aadan xaq u lahayd in aad hesho lacag-bixin 90 maalmood. Haddii qandaraaskaaga la joojiyo waa in aad sugto 90 maalmood ka hor inta aadan xaq u yeelan in aad hesho qandaraas cusub.
- Haddii aad si weyn ama aad si soo noqnoqota uga badsato xaddadka toddobaadkaaga shaqada ama waqtiga socdaalka, DSHS waxaa ay u joojin kartaa qandaraaskaaga fulin-waa waxaa ayna diiddi kartaa in ay qandaraas kale kula gasho.

**22. In intee le'eg ayay tallaabooyinka sharci ee qandaraaska ku jiri karaan faylka qandaraaskeyga?**

Tallaabo kasta oo sharci ah ee qandaraaska waxaa ay furnaan doontaa 12 bilood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska tallaabada sharci ee qandaraaska. Ka dib 12 bilood, tallaabada sharci ee qandaraaska waa la xirayaa.

**23. Sidee ayaan uga fogaan karaa tallaabooyin qandaraas?**

- Had iyo jeer waqti hore qorsheyso jadwalka shaqadaada ka dibn meel ku qoro.
- Haddii baahiyada macmiilka ay isbeddelaan oo ay tahay in aad ku shaqeyso jadwal kale oo saameynaya WWL-kaaga, si degdeg ah ula xiriir maareeyaha kiiska macmiilka.
- Ku diiwaangeli waqtigaaga shaqada xaashidaada waqtiga ka dib maalin kasta ee aad shaqeyso, waxaa sidoo kale caawimo leh in lagu diiwaangeliyo kalandaariye waraaq ah. Badanaa eeg si aad u hubiso in aan ku jirto gudaha WWL-kaaga.
- DSHS waxaa ay leedahay khayraad ku caawinaya adiga iyo cidda aad u shaqeyso/macmiilka in aad wax badan ka ogaatiin maareynta jadwalkaaga si aad u dhex joogto gudaha WWL-kaaga. Khayraadkan waxaa laga heli karaa [www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT](http://www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT).